

Sagaalka sano, 930 milyan Canshuurta Dhaqaaji Seattle waxa ay ku filnaan maalgelinta qeyb ahaan Barnaamijka Ballaarinta RapidRide, iyo maagelinno kale oo lagu sameeyo mashaariic lagu hagaajinayo nabadda dhammaan musaafiriinta, dayactirka waddooyinka iyo buundooyinka, iyo socod qiime jaban ee magaalada koreysa.

Waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT) waxay la shaqeyn doontaa Metro Degmada King si ay u daba gasho sugidda maalgelinta barnaamijyada iyo fursado iskaashi si ay u ballaarisoo lacagaha canshuur bixiyayaasha una daboosho kharashka barnaamijka oo dhan.

KU LUG YELO

Waxanu la shaqeyn doonnaa bulshooyinka kale xilliga qorsheynta naqashadda, iyo dhismaha wejiyada cusub ee khadadka RapidRide ee Seattle. Khadkii cusubba, waxanu idila wadaagi doonnaa macluumaad, waxanuna idin weydiin doonnaa talooyin, iyo innagoo muujin doonna sida talobixintii bulshada loogu saleeyey naqashadda.

Si aad wax uga ogaato Barnaamijka Ballaarinta RapidRide iyo sida aad ugu lug yeelan karto, fadlan booqo www.Seattle.gov/Transportation/RapidRideExpansion.htm.



BALLAARINTA BARNAAMIJKA RAPIDRIDE EE SEATTLE

Maarso 2017

Seattle waxey ka mid tahay magaalooyinka dalka kuwooda sida dhaqsida ah ugu korriimada badan taasi oo sii kordhisay baahida loo qabo gaadiid sahla isu socodka. SDOT waxey la shaqeyneysaa King County si loo ballaariyo isku xirka Metro RapidRide magaalada oo dhan, qorsheynta toddoba khad cusub si ay u caawiso isku xirka dadka, goobaha, iyo wax soo saarka.

FIDINTA RAPIDRIDE WAXEY HORUMARIN DOONTAA ISKU GAADIIDKA

Wuxuu horurinayaa balaqaadkii gaadiidka ee Canshuurtii Dhaqaaji Seattle (Levy to Move Seattle) si loogu helo 72% dadka deggan Seattle adeeg gaadiid 10kii daqiiqo mar yimaada ama mid ka fiican oo maalintii oo dhan ay ka heli karaan goob ay 10 daqiiqo oo kaliya oo socod ah u jirta gurigooda

Isku xirka adeegyada ugu fiican ee Metro Degmada King oo si sahal, iyo adeeg joogto ah ay bixiyaan gawaaridii Metro ee ugu dambeeyey

Ka gudubka adeeg gaadiidka kaliya balse in la isku xiro dadka soconaya iyo kuwa baaskiilada ku soo aada xarumaha gaadiidka iyadoo loo hagaajinayo waddooyinka lagu lugeeyo, wadiiqooyinka, iyo xaafadaha cagaaran



In lagu xiro xaafadaha kala duwan bartamaha magaalada, goobaha gaadiidka, fursadaha shaqo, iyo deeggaannada laga dukaameysto

Wuxuu isku keenayaa SDOT iyo Metro Degmada King si ay uga hadlaan dheereynta baska iyo adeeg laysku halleyn karo, si aannu si wanaagsan ugu hubinno dhaqsiyo iyo in basku ku yimaado ballanta



RAPIDRIDE Hadafka Shaqo ee Seattle

Adeeg Isdaba Joog ah
Maalinkii oo idil, fiidkii, sabtida iyo axadda


10- daqiiqo
Maalinkii oo idil ama ka wanaagsan

15-30 daqiiqo ama ka wanaagsan Hebeenkii iyo toddobaadka dhamaadkiisa

10-15% Dhaqsi
Waqtiyada basku safarka yahay

+50% dadka raacaya oo kordha
5 sano gudahood

Ballanta 85%
Waqtiga baska ku imanayo



PROGRAM INFORMATION & CONTACT
Dawn Schellenberg, SDOT
RapidRide@Seattle.gov or (206) 684-5189



PROGRAM INFORMATION & CONTACT
Dawn Schellenberg, SDOT
RapidRide@Seattle.gov or (206) 684-5189



TILMAAMAHA FURAHA U AH RAPIDRIDE

LAYMANKA BASKA LOO GOONI YEELAY

Laymanka Bas-kaliya waxay basaska ka soocayaan baabuurta kale, waxey kordhinayaan dhaqsiyaha iyo ku kalsoonaanta.




BOOSTEEJOOYIN HORUMARSAN

Xarumaha bas raaca RapidRide waxa ka mida warbixin waqtiga sugan, aqal ballaaran, iyo waxyaabo xiiso leh.



BIXINTA KHARASHKA INTA AADAN RAACIN

Kharash bixinta baska bannaankiisa waxey caawineysaa degdegsoomada iyadoo raacayaashu ay bixinayaan iyagoon saf gelin.



BASASKA GAARKA AH

Basaska RapidRide waxey awood u leeyihiin iney hoos u dhigaan sagxaddooda marka la korayo ama laga degayo.



NALAL CAQLI BADAN

Nalalka waxey mudnaan siin doonaan basaska si ay u yaraato sugidda nalka cagaaran.



KU XIRKA BAASKIILLEYDA IYO SOCOTADA BASASKA

Hagaajinta isgoysyada, xaafadaha cagaaran, iyo leymanka baaskiillada waxey dadka ka caawini doonaan helista leyman bas cusub.



FURIDDA JADWAL CUSUB OO HORUDHAC AH

2019	2020	2021	2022	2023	2024
Leenka G <i>Downtown Seattle ilaa First Hill ilaa Madison Valley</i>	Leenka H <i>Downtown Seattle ilaa Delridge ilaa Burien</i>	Roosevelt <i>Downtown Seattle ilaa Eastlake ilaa Roosevelt Rainier</i> <i>Downtown Seattle ilaa Mt Baker ilaa Rainier Beach</i>	Market <i>Ballard ilaa Wallingford ilaa U-District</i>	Fremont <i>Downtown Seattle ilaa Fremont/Ballard ilaa Northgate</i>	23rd <i>Mt Baker ilaa Central Area ilaa ilaa to U-District</i>

Taariikhda furidda waxbaa iska beddeli kara iyadoo khadadku qorsheyn kaga gudbayaan naqshadeyn iyo iyadoo la ogaan doono halka dhaqaaluhu ka imanayo.

